

Liisto-hubineedda Codsiga Shati-qaadashada Licensing Application Checklist

- Codsiga Daraasada Guriga Qoyska, DCYF 10-354:** Gebi ahaan buuxi waxaadna ku dartaa macluumaadka xiriirka ee **seddex** qofood oo ka warbixin kara oo ay ka mid yihiin cinwaannada boostada iyo lambarada teleefoonka. Dadka kaa warbixinaya laba qof waa in aadan qaraabo ahayn, hal qofna waa in aad qaraabo tihiin, waxaadna qortaa dhammaan carruurta qaangaarada ah. Shati-bixiyahaaga ayaa wuxuu la xiriiri doonaa dadka kaa warbixinaya.
- Oggolaanshaha Asalka (BAF), DSHS 09-653:** Qof kasta oo 16 sano jir ah ama ka weyn ee dhismaha ku nool waa in uu Soo gudbiyaa BAF oo uuna bixiyaa nuqul aqoonsi oo sawir leh. **Qaybta 2** ee ku taal foomka BAF waa in gebi ahaanba la buuxiyaa. Marka BAF la helo, shakhsiyaadka 18 sano jirka ah ama ka weyn iyo shakhsiyaadka 16 ama 17 jirka ah ee ku soo noolaa meel ka baxsan Washington saddexdii sano ee ugu dambeysay waxay heli doonaan tilmaamo loogu talagalay ballanta qaadista sawirka faraha. **Ogow: Waxaad Ka buuxin kartaa BAF online-ka adiga oo booqanaya <https://fortress.wa.gov/dshs/bcs/>.** Linkigan wuxuu si wanaagsan ugu shaqeynayaa bogga laga daalacdo internet-ka ee Chrome.
 - Dhammaan foomamka BAF-yada laga buuxiyay baraha internet-ka, waxaa lagu siin doonaa lambar xaqiijin/aqoonsi kantarool ah. Waxaad macluumaadkaasi siisaa shati-bixiyahaaga si uu uga baraandego.
- Qorshaha Daadgureynta Xaaladaha Deg-degga Ah ee DCYF, 16-204:** Fadlan buuxi ka-dibna saxiix.
- Waraaqda Shaqada Maaliyadeed, DCYF 14-452:** Fadlan ku soo lifaaq xaqiijinta dakhliga (tus. W-2s, gunta jeegga mushaarka, iwm.).
- Warbixinta Caafimaadka Codsadaha, DCYF 13-001:** Baaritaan jireed oo la sameeyay 12-kii bilood ee ugu dambeeyay gudahooda ayaa looga baahan yahay codsade kasta. Fadlan ku qor xarfaha hore ee magacaaga ka-dibna saxiix qaybta kore ee foomka waxaadna siisaa shati-bixiyahaaga adiga oo raacinaya macluumaadka xiriirka ee bixiyaha adeegaaga caafimaadka. Shati-bixiyaha waa in uu codsiga caafimaadka si toos ah ugu diraa adeeg bixiyaha.
- Macluumaadka Shakhsiyeed, DCYF 15-276:** Looga baahan yahay codsade kasta.
- Nuqulka Shatiga(Shatiyada) Darawalka iyo Caymiska Gaariga:** Bixi nuqullada hadda ee loogu talagalay codsade kasta.
- Nuqulka Baaritaannad Cudurka Qaaxada (TB):** Loo baahan yahay natiijooyinka 12kii bilood ee la soo dhaafay ee qof kasta ee ay da'diisu tahay 18 sano **ama** ka weyn ee ku nool guriga.
- Nuqulka warqadaha ama kaararka Gargaarka Degdegga ah, CPR, Jeermiska Dhiigga Gala ee Cudurrada Keena ee La Kala Qaado, iyo Fayraska HIV/Aydhiska:** Looga baahan yahay qof kasta oo ay da'diisu ugu yaraan tahay 18 sano oo daryeela ah. **CPR waa in ay noqotaa shaqsi ahaan** waxaanna loo baahan yahay CPR Carruurta / Ilmaha Yaryar haddii la daryeelayo cunug da'diisu ka yar tahay 8 sano. Shatiyada caafimaadka firfircoon ayaa sidoo kale buuxin kara shuruuddan; waxaad kani siisaa shati-bixiyahaaga.
- Nuqulka Shahaadooyinka Hanuuninta iyo Tababarka Aasaasiga ah ee Daryeelaha:** Looga baahan yahay hal codsade, balse labada codsadayaalba waxaa lagu dhiirrigelinayaa in ay ka qaybgalaan.
- Nuqulka baaritaanka biyaha ee la sameeyay 12kii bilood ee la soo dhaafay gudahooda:** Kaliya loo baahan yahay haddii la adeegsado ceel gaar loo leeyahay ama ay bulshadu leedahay.
- Diiwaannada tallaalka ee carruurta ku sugan guriga:** Tani looma adeegsan karo carruurta la korsado.
- Haddii aad codsanayso in shati lagu siiyo carruur ay da'doodu ka yar tahay 2 sano oo caafimaad ahaanna nugul:**
 - Caddeynta tallaalka Tdap ama DTap (Jix / Xiiq-dheer) ee loogu talagalay **dhammaan** xubnaha ka tirsan reerka.
 - Caddeynta tallaalka Ifilada (hargabka) ee loogu talagalay **dhammaan** xubnaha ka tirsan reerka ee da'doodu tahay lix bilood ama ka weyn
- Diiwaannada Tallaalka iyo Raabiyada ee loogu talagalay xayawaanka rabaayada ah**

XASUUSNOW:

- Liis-hubineedda Baarista Guriga Korsashada, DCYF 10-183, ayaa kugu caawin doonta in aad gurigaaga u diyaariso baarista shati-qaadashada. Shati-bixiyaha ayaa foomka kula buuxin doona
- Foomamka xagga sare lagu xusay ayaa waxaa la heli karaa marka uu codsado shati-bixiyahaaga. **Fadlan hayso nuqulka diiwaanadaada.**
- Soo-gudbinta codsiga, DCYF 10-354, iyo baaritaannada raadraaca, DSHS 09-653, ayaa bilaabaya hannaanka shati-qaadashada, balse waxaan kugu dhiirrigelinaynaa in aad soo gudbiso xirmo si buuxda u dhammeystiran si loo helo ka baraandegid ama ka shaqeyn hufan oo dhaqso ah.
- Marka codsigaaga la helo waxaa 7 maalmood gudahooda kula soo xiriiri doona Qaybta Shati-bixinta (LD).

Waad ku mahadsan tahay daneyntaada ee aad daneynayso in aad noqoto waalid korsasho ama daryeel qaraabo ah oo shati-haysta!

La-hawgalayaasheenna barnaamijka Alliance CaRES program ayaa la heli karaa si ay kuu taageeraana! CaRES ayaa bixiya macluumaad ku saabsan noqoshada waalid korsasho, taageero la siiyo waalidiinta hadda carruurta korsata iyo daryeelayaasha qaraabada ah, iyo in kale oo dheeraad ah, Fadlan kala xiriir CaRES lambarkan 206-221-4913 ama iimayl-kan alliancecares@uw.edu si aad wax badan uga oggaato!